



HM Government

Grenfell
community
updates

Grenfell Tower community update: October 2026 - Somali/ Af-Soomaali

Xogta cusub ee bulshada Grenfell Tower: Oktoobar 2026

Waxaan aqoonsannahay in Grenfell Tower uu muhiimad gaar ah oo qoto dheer u leeyahay dadka ay sida aadka ah u saamaysay masiibada, iyo in dhulku uu yahay mid xasuus gaar ah ugu fadhiya qoysaska.

Waxa aanu doonaynaa in aanu kula socodsiiyo shaqadeena inta aanu sida taxadirka leh u duminayno Tower-ka.

Xogtan cusub waxa aad ka heli kartaa macluumaad cusub:

- **La socio xogta dhaska, gariirka iyo codka**
- **Taageerada caafimaadka iyo badqabka**
- **Sida aad noola hadli karto ama aad wax badan u ogaan karto**

Halkaan ayaad ka arki kartaa xogihii hore: www.gov.uk/grenfell-community-updates

La socio xogta dhaska, gariirka iyo codka

Dawlada waxaa ka go'an inay xaqiijiso in dhamaan shaqada ka socota goobta Grenfell Tower loo qabo sida ugu wanaagsan. Amaanka iyo badqabka bulshada iyo dadka ka shaqaynta goobta ayaa ah mudnaanta kowaad. Waxaa jira kormeerayaal goobta jooga oo uruurinaya xogta tooska ah ee busta, gariirka iyo qaylada. Xogta waxaa la baahiyaa bil kasta. Si aad u aragto warbixinta ugu danbaysa, fadlan guji linkiga hoose:

[Warbixinta la socodka busta 27 da Luulyo ilaa 30 ka Agoosto 2026](#)

[Warbixinta la socodka gariirka 27 da Luulyo ilaa 30 ka Agoosto 2026](#)

[Warbixinta la socodka qaylada 27 da Luulyo ilaa 30 ka Agoosto 2026](#)

Hay'ada Amaanka Caafimaadka UK (UKHSA) waxay sii wadi doontaa la socodka iyo qiimaynta tayada hawada ee aaga ku xeeran Grenfell Tower inta ay shaqadu socoto. Waxay baahisaa warbixinaheeda bil kasta. Waxa aad ka arki kartaa halkan warbixinta ugu danbaysa:

[La socodka deegaanka kadib dabkii Grenfell Tower - GOV.UK](#)

Taageerada caafimaadka iyo badqabka

Hadii aad doonayso inaad la hadalo ruux, adeegyada Caafimaadka iyo Badqabka

Grenfell waxaa weeye adeeg NHS oo bilaash ah oo sir ah oo loogu talo geley caruurta iyo dadka waawayn. Taageerada ayay weli heli doonaan qoysaska geesiyada, dadka badbaadada, iyo dadka degan ee ku xeeran bulshada ee ka shaqaynaya sidii ay u dumin lahaayeen Grenfell Tower. Hadii aad doonayso inaad la hadasho ruux, waxa aad:

- Kala hadal Adeega Badqabka Grenfell lambarkan 020 8637 6279 (8am ilaa 8pm, maalin kasta).
- Kala hadal khadka talada halka meel ee Central and North West London NHS Foundation Trust's (CNWL) wixii xaalada degdega ah: 0800 0234 650 (24 saacadood maalintii, todoba maalmood todobaadkii).
- Iimeelka: grenfell.wellbeing.service@nhs.net
- Booqo: www.grenfellwellbeing.cnwl.nhs.uk wixii macluumaad dheeraad ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan adeegyada la heli karo, booqo www.grenfell.nhs.uk

Sida aad noola hadli karo ama aad wax badan u ogaan karto

Waxa aanu doonaynaa in aanu u wadaagno macluumaadka si wax kuu taraya. Waxa aanu si joogto ah usoo gelin doonaa xogta iyo macluumaadka cusub: www.gov.uk/grenfell-community-updates

Fadlan iimeel noogu soo dir: GrenfellTowerSite@communities.gov.uk to:

- Qabso ballan aad nagula hadasho, ama aad kula hadasho qandaraaslaha koowaad ee dhismaha Grenfell Tower, DCUK.
- Na waydii wixii su'aalo ah ee aad ka qabto ama noo sheeg wixii walaac ah ee aad ka qabto shaqadeena uduminta Tower-ka si taxadir leh.
- Naga dalbo inaan iimeel si joogto ah kuugu soo dirno xogta ugu dambeeyay.
- Nala wadaag fikirkaaga sida aanu kuula soo xidhiidhayno oo aanu kuula shaqaynayno, hadii aad doonayso. Waanu soo dhawaynaynaa fikirkaaga.

Xogta ugu danbaysa ee Grenfell Tower, iyo si aad iskugu duwaan geliso wargelinta iimeelkaaga, fadlan qabo: www.gov.uk/grenfell-community-updates ama iskaan garee QR koodhka.

